Ogow **DHAMMAAN** faa'iidooyinkaaga

# Diiradda la saarayo: **Gaadiidka**

Caafimaadkaagu muhiim ayuu noo yahay, taasi oo ah sababta ay faa'iidooyinkaaga ugu jiraan caawimaada safarka lagu aadayo balamaha daryeelka caafimaad iyo adeegyada ee caymiskooda la daboolo iyada oo la adeegsanayo Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP). Haddii aadan haysan hab aad ku aado daryeelka caafimaadka oo caymiskooda la bixiyo, hawl wadaagaheena **Ride to Care** ayaa ku geyn karta.

## Saddex siyaabood oo lagu tago balamaha

**Kooxda macmiilka adeega ee Ride to Care ayaa kaala shaqeyn doonta in aad hesho kala doorashado ugu habboon uguna kharashka yar si ay ugu habboonaato baahiyahaaga:**

### Gaadiidka dadweynaha

Waxaanu bixinaa gaadiid raacid maalin kasta ah ama bile ah. Waanu ka wada hadli doonaa balamahaaga oo go'aansan doonaa haddii gaadiid raacid maalin ah ama bile ah uu ku habboon yahay booqashooyinkaaga la qorsheeyay.

### Lacag celinta

Waxaanu bixinaa qiimaha maylkiiba ee masaafada la socdo ee lagu aadayo lagana soo noqonayo booqashooyinka daryeelka caafimaadka. Adiga naftaada ayaa wadi/kaxayn kara, ama qof kale ayaa ku wadi/kaxayn kara. Foomka caddeynta balanta ka soo daabaco **ridetocare.com** oo shaqaalaha xafiiska daryeel bixiyaha ka codso in uu saxiixo iyada. Lacag celinta waxaa lagu shubay kaarka daynta ee la sii bixiyay.

### Gaari raacista la bixiyo

Waxaan qorsheyn karnaa gaari raacista gaarka ah ee la wadaago. Iyada oo ku saleysan baahiyahaaga caafimaad, waxaan soo diri karnaa sedan, baabuurka van-ka oo leh kursiga curyaanka, gaari leh sariir 'stretcher' ama ambalaaska aan degdeg ahayn.

Waxaad xaq u leedahay in aad codsato raacitaanta isla maalintaas ah ama maalinta xigta ah. Si kastaba ha ahaatee, haddii codsigaagu yahay mid ogeysiin waqti gaaban ah la haysto, oo dalabka gaadiid raacida loogu talagalay yahay mid sarreeya, waxaan mudnaan siinaa codsiyada caafimaad ahaan degdega ah.

Wac **Ride to Care** si aad waxyaalo dheeraad ah uga ogaato **855-321-4899 ama TTY 711**

**Waxaad Ride to Care ka wacdaa 855-321-4899 ama TTY 711** si aad u ogaato adeegyada kugu habboon. Waqti kasta oo aad soo wacdo, waxaan ku weydiin doonaa su'aalo adiga kugu saabsan iyo safarka aad codsaneyso. Mar kasta oo ay suurtagal tahay, fadlan nagu soo wac labo maalmo shaqo gudahood ka hor balanta daryeelka caafimaadka si looga wada hadlo loona qorsheeyo gaadiidkaaga. Waxaad jadwal ku sameynsan kartaa ilaa 90 maalmood ka hor.

**Haddii aad hayso wax su'aalo ah, Adeega Macmiilka ee CareOregon ka wac 800-224-4840.**

**careoregon.org**

health share
Health Share of Oregon

CareOregon

# Wax ka ogow CareOregon

## Gaadiidku waa adeeg ay bixiso CareOregon, qorshahaaga caafimaadka Medicaid.
Halkan ka ogow waxyaabo badan oo nagu saabsan.

Marka ay dadku ka hadlaan Medicaid ka jirta Oregon, waxaa dhici karta in aad maqasho iyaga oo dhahaya magacyo iyo warqado badan oo kala duwan. Sababtu waa in ay jiraan ururo badan oo ku lug leh xaqiijinta in aad hesho daryeelka aad u qalanto. Sidee baad macne ugu yeeli kartaa haba yaraatee?

## Waxay gacan ka geysataa in aad uga fikirto Medicaid ka jirta Oregon in ay tahay sida qaabka pyramid oo kale.

**Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA)** ayaa gacanta ku haya barnaamijka Medicaid ee loogu talagalay gobolka Oregon oo dhan, kaasi oo loogu yeero Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP).

**Health Share of Oregon (HSO)** waa waxa loo yaqaano daryeelka ururadu iska kaashadeen (CCO). Health Share of Oregon waxay ka hoos shaqeysaa OHA si ay ugu adeegto xubnaha ka tirsan OHP ee ku nool degaanka saddexda-magaalo ka kooban.

**CareOregon** waa mid ka mid ah dhowr bixiyayaasha caafimaadka oo ku yaala degaanka saddexda-magaalo ka kooban oo Health Share CCO ka caawiya n ay bixiso daryeel. Adeegyada turjumaadaha ayaa lagu daboolayaa/bixinayaa CareOregon.

**Daryeel bixiyahaaga aasaasiga ah (PCP)** wuxuu noqon karaa dhakhtar, kalkaaliso sare, kalkaaliyaha dhakhtarta ama daaweynta bedelka ah 'naturopath'. Waxay isku duwaan daryeelkaaga aad la leedahay CareOregon iyo xubnaha kale ee kooxda caafimaadka sida dhakhaatiirta ilkaha, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka maskaxda, farmashiiyayaasha iyo kuwo kale.

### CareOregon waxay bixisaa adeegyada kuwan oo kale ah ee loogu talagalay xubnaha Medicaid (OHP):

- Daryeelka caafimaadka jirka
- Daryeelka caafimaadka dhimirka
- Isticmaalka mukhaadaraadka
- Daryeelka ilkaha
- Medicare la sii marayo CareOregon Advantage
- Daryeelka bukaanka hospice ama daaweynta oo la adeegsanayo Bixiyayaasha Housecall

### Waxaad sidoo kale awoodi doontaa in aad isticmaasho adeegyo muhiim ah sida kuwani oo kale:

- Isku duwida daryeelka
- Farmashiyaha
- Daryeelka dhalashada ilmaha ka hor iyo daryeelka dhallaanka
- Kala doorashada gaadiidka
- Adeegyada turjumaada luqadda
- ER iyo daryeelka degdega ah

### Su'aalaha?

Ma jeclaan lahayd in aad waxyaabo badan ogaato? **Kooxdeena Adeega Macmiilka** ee waxtarka iyo saaxiibtinimada leh ka wac **800-224-4840** ama farriin ammaan ah noogu soo dir ***careoregon.org/portal***

Waxaad heli kartaa tani oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Waxaad sidoo kale codsan kartaa turjubaan. Caawimaadani waa lacag la'aan ah. Wac 800-224-4840 ama TTY 711.